# Civil Rights and Nondiscrimination Grievance Procedure
# Habraaca Xuquuqda Madaniga ah iyo Cabashada Takoor La'aanta

Aqballaada

____________________________
Julie S. Moore, P.E., Xoghayaha
Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah

## § 1. Ujeedada iyo Adeegsiga

(a) Ujeedada. Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont (ANR) ayaa dhaqan gelinaysa Habraacaan Xuquuqda Madaniga ah iyo Cabashada Takoor La'aanta si loo xaqiijiyo xalalka degdeg ah ee cadaalalda ah ee cabashooyinka ka yimaada xubnaha bulshada ee ka cabanaaya takoor loogu gaystay shaqada barnaamijyada, adeegyada, ama hawlaha ANR.

(b) Adeegsiga. Habraacaan ayaa qabanaaya cabashooyinka takoorka ay gaysato ANR ama qaataha maal gelinta ANR oo ku saleysan isirka, diinta, caqiidada, midabka, wadanka asalka qofka, goobta dhalashada, naafada, da'da, xaalada guurka, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga galmada, iyo naas-nuujinta. Qof kasta oo soo gudbiya cabashada takoor ay gaysatay ANR ama qaataha maal gelinta ANR ayaa soo gudbin kara cabasho sida ku cad Habraacaan.

**Qodobo Muhiim ah:** Cabashooyinka takoorka goobta shaqada ayaa lagu cadeeyay Xeerka Shaqaalaha Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee Qaybta Lambarkeedu yahay 3.3. Cabashooyinka la xiriira takoorka ee quseeya Sharciga Caawimaadaha Dadwaynaha ee Vermont, 9 V.S.A., Cutubka 139, iyo Sharciga Shaqada Cadaallada ah, 21 V.S.A § 495, waa in sidoo kale lagu hagaajiyaa Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Vermont. Gudbinta cabasho sida ku cad Habraacaan ayaan kahor istaagi karin cabtaha inuu cabasho u gudbibiyo midkood wakaallada federaalka ama gobalka ama inuu helo tallo bixin sharci. Arag Lifaaqa 1.

## § 2. Helitaanka Luuqada iyo Caawimaadaha Macquulka ah

“Questions or Complaints/Free Language Services I SERVICES LINGUISTIQUES GRATUITS | भाषासम्बन्धी □न:शुल्क सेवाहरू I SERVICIOS GRATUITOS DE IDIOMAS I 免費語言服務 | BESPLATNE JEZIČKE USLUGE I БЕСПЛАТНЫЕ УСЛУГИ ПЕРЕВОДА | DỊCH VỤ NGÔN NGỮ MIỄN PHÍ I 無料通訳サービス I ነጻ የቋንቋ አገልግሎቶች | HUDUMA ZA MSAADA WA LUGHA BILA MALIPO | BESPLATNE JEZIČKE USLUGE | အခမဲ့ ဘာသာစကား ဝန်ဆောင်မှု များ | ADEEGYO LUUQADA AH OO BILAASH AH I : خدمات لغة مجانية anr.civilrights@vermont.gov or 802-636-7827.”

Haddii aad ku hadasho luuqad aan ahayn Ingiriis, ANR ayaa bixisa adeegyada caawimaada luuqada oo bilaash ah. Fadlan toos ugala xiriir ANR (802) 636-7827 ama booqo webseedkeena Adeegyada Luuqada si aad u hesho xog dheeri ah.

Haddii aad dooneyso inaad codsato caawimaadaha helitaanka ama haddii aad qabto su'aalo la xiriira kala-duwanaanta, sinaanta iyo u dhammaanta, fadlan la xiriir Agaasimaha Xuquuqda Madaniga ah iyo Cadaallada Deegaanka ee Wakaallada iyo

Iskuduwaha Kahortaga Takoorka Karla Raimundí ANR.CivilRights@vermont.gov ama wac (802) 636-7827.

**§ 3. Takoorku waa Mamnuuc**

Ma jiro qof laga reebi karo ka qaybgalka, loo diidi karo dheefaha, ama loogu gaysan karo takoor barnaamijyada, adeegyada, ama hawlo kasta oo ay leedahay ANR ayadoo lagu saleynaayo isir, diin, caqiido, midab, wadanka qofka, asalka, meesha uu ku dhashay, naafada, da'da, xaalada guurka, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga, ama naas-nuujinta.

**§ 4. Caga-juglaynta iyo Aargoosigu waa Mamnuuc**

Caga-juglaynta iyo aargaasigu waa mamnuuc cabashooyinka la xiriirana caga-juglaynta iyo aargoosiga waxaa loo xalin doonaa si degdeg ah oo cadaalad ah oo waafaqsan habraacaan isla qaabka loola tacaalo cabashooyinka kale ee takoorka. Eeg 40 C.F.R. § 7.100.

**§ 5. Codsiyada Dadban**

Haddii xubin kamid ah bulshada uusan dooneyn inuu cabasho rasmi ah gudbiyo si loo baaro laakiin uu qabo su'aalo ama walaacyo kale oo la xiriira xuquuqda madaniga ah iyo/ama takoor la'aanta, wuxuu la xiriiri karaa Iskuduwaha Kahortaga Takoorka ANR oo uu ka helaayo ANR.CivilRights@vermont.gov ama ka wici karo (802) 636-7827.

**§6. Gudbinta Cabasho**

(a) Qof kasta oo ka cabanaaya takoor loogu gaystay shaqada barnaamijyada, adeegyada, ama shaqooyinka ANR yaa soo gudbin kara cabasho waafaqsan Habraacaan. Cabashooyinka ayuu soo gudbin karaa qofka ka cabanaaya takoorka ama qof goobjoog u ahaa falka takoorka ah oo dhacaaya.

(b) Wakhtiga iyo Xogta Cabashada. Cabashadu waa in:

(1) loogu soo gudbiyaa qoraal ahaan boostada ama iimeylka:

**Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont**
Karla Raimundí, Agaasimaha Xuquuqda Madaniga ah iyo Cadaallada
Deegaanka iyo Iskuduwaha Kahortaga Takoorka
Davis Building – 2nd Floor
One National Life Drive
Montpelier, VT 05620-0301
ANR.CivilRights@vermont.gov

(2) waa in lagu soo gudbiyaa 180 maalmood gudahood kadib marka falka takoorka laga cabanaayo dhacay;

(3) waa inuu qeexaa sifooyinka gaarka ah ee falka laga cabanaayo uuna keenaa dukumiintiyada taageeraaya ama cadeyn la xiriira falka laga cabanaayo; iyo

(4) haddii soo gudbiyaha cabashadu uusan ahayn qofka takoorka loo gaystay, waa in la cadeeyaa dhinaca ama dhinacyada saamayntu kasoo gaartay ama saamayntu kasoo gaari karto takoorka laga cabanaayo.

(c) Aqbalaadda Cabashada. 14 maalmood gudahood kadib marka uu helo cabashada qoraalka ah Iskuduwaha Kahortaga Takoorka ee ANR ayaa:

(1) u xilsaaraaya qof inuu baaritaan ku sameeyo cabashada (Baaraha ANR);

(2) siinaaya cabtaha ogeysiis qoraal ah oo la xiriira helitaanka iyo ogeysiiska magaca iyo xogta xiriirka baaraha ANR ee loo xilsaaray cabashada;

(3) wuxuu waydiinayaa cabtaha in uu cabashada u diray wakaalad ama waax kale; iyo

(4) wuxuu codsanayaa xog kasta oo dheeri ah oo loogu baahan yahay fududeynta baaritaanka cabashada.

## § 7. Baaritaanka Cabashooyinka Takoorka Ka Dhanka ah ANR

(a) Baaritaanka Cabashooyinka Takoorka. Baaraha ANR ayaa qaab qoraal ah ku diiwaan gelin doona, ama haddii wareysi la qaaay duubaaya, dhammaan falalka dhacay si loo baaro eedaynta takoorka sida ku cad Habraacaan.

(1) Baaraha ANR ayaa awood u yeelan doona inuu codsado xogta duuban, oo ka imaanaysa qof kasta oo la xiriiri kara cabashada lagu soo gudbiyay Habraacaan.

(2) Baaraha ANR ayaa xaq u leh inuu wareysiyo ka qaado qof kasta oo la xiriiri kara kiiska cabashada. Shaqaalaha gobalka ayaa la shaqeyn doona baaritaanka laakiin wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu codsado matalaada midawga shaqaalaha marka uu wareysi ka qaadaayo Baaraha ANR. Haddii codsiga noocaas ah la diro, Baaraha ANR ayaa arinta waafajinaaya sida ku cad qayb hoosaadka (i) ee qodobkaan. Baaraha ANR ayaa u sheegaaya Cabtaha in kiiska loo gudbiyay Wakaallada Adeegyada Shaqaalaha ee Vermont.

(3) Haddii cabashada loo diray wakaallo badan, Baaraha ANR ayaa la xiriiraaya wakaaladahaas iskuna xiraaya baaritaanka.

(b) Xalka Gaarka ah ee Cabashada Takoorka. ANR iyo cabtaha ayaa dalban kara inay cabashada si dadban u xaliyaan ayna abuuraan heshiis gaar ah oo ku aadan cabasho lagu soo gudbiyay habraacaan. Qaraarka gaarka ah waa in loo gudbiyaa Baaraha ANR. Haddii baaraha ANR uu go'aansho in qaraarka gaarka ah uu cadaalad yahay uuna yahay maslaxada guud ee dhammaan dhinacyada, Baaraha ANR ayaa qaraarka gaarka ah u gudbinaaya Xoghayaha si uu u ansixiyo. Kadib marka uu ansixiyo Xoghayaha, Baaraha ANR ayaa tuuraaya cabashada.

(1) Ogeysiiska Ansixinta iyo Tuurista. Baaraha ANR ayaa masuul ka ah inuu ogeysiiyo labadaba cabtaha iyo maamulka ay qusayso ee ANR ansixinta Xoghayaha iyo tuurista cabashada ee ka raatibmaysa arintaas. Ogeysiiska ayaa lagu bixin karaa ogeysiiska rasmiga ah ee qoraalka ah, kaasoo ay ku jiri karaan iimeyl, boosto la xaqiijiyay, ama qaababka kale ee qoran si loo xaqiijiyo helitaanka.

(2) Xirista Diiwaanka. Galka cabashada waa inay ku jirtaa qaraarka gaarka ah oo saxiixan, ansixinta Xoghayaha, iyo ogeysiiska rasmiga ah ee tuurista. Nuqullada dukumiintigaan waa in la siiyaa cabtaha, Iskuduwaha Kahortga Takoorka ee ANR iyo maamulka ay qusayso si loo xaqiijiyo in cabashada si rasmi ah loo xaliyay lana tuuray. Xogta waa in loo qoraa sida ku cad Qaybta 8 ee Habraacaan.

(c) Ujeedada Habraacaan awgeed, Dhinacyada Baaritaanka waxaa ku jiri kara shaqsiyaadka ama wakaaladaha soo socda; cabtaha, shaqsiga ama shaqsiyaadka saamayntu kasoo gaartay ama ay kasoo gaari karto takoorka laga dacwoonaayo, shaqsiyaaddka lagu eedeeyay takoorka, iyo ANR.

(d) Heerka Dib U eegista. Heerka dib u eegistu qiimeynta kore ee cadeynta taasoo ka dhigan in falka takoorka ah ee lasoo eedeeyay loo arkaayo mid dhacay in ka badan inta loo arkaayo inuusan dhicin.

(e) Natiijooyinka Hordhaca ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga. 90 maalmood gudahood kadib marka lasoo afmeero baaritaanka, Baaraha ANR waa inuu siiyaa Dhinacyada Natiijooyinka Hordhaca ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga ee Baaraha ANR, kuwaasoo soo koobaaya natiijooyinka baaritaanka; uu so saaraa go'aan, asagoo ku saleynaaya qiimeynta cadeynta; in uu dhacay falka takoorka ah ama haddii barnaamijka, adeegyada, ama hawlaha ANR ay takoor u gaysteen ama xumeeyeen xaalad uu difaacaayo Habraacaan; uuna aqoonsadaa talaabooyinka haboon si loo xaliyo falka takoorka ah ama saamaynta xun.

(f) Jawaabta Dhinacyada. 15 maalmood gudahood kadib marka la soo saaro Natiijooyinka Hordhaca ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga, Dhinac ayaa:

(1) Codsan kara dhageysiga rasmiga ah ee cabashada; ama

(2) Keeni kara faallo qoraal ah oo ku aadan Natiijooyinka Hordhaca ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga.

(g) Dhageysiga Rasmiga ah. Haddii dhinac codsado dhageysi rasmi ah, markaas ANR waa inay samaysaa dhageysiga noocaas ah.

(h) Dhageysiyada ku jira Qaybtaan waa in loola tacaamulaa kiis la isku haysto oo waafaqsan 3 V.S.A. § 809, Natiijooyinka Kama danbaysta ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga. Haddii uusan jirin Dhinac codsaday dhageysi rasmi ah, markaas Baaraha ANR waa inuu:

(1) Dib u eegaa faallooyin kasta oo qoraal ah oo la xiriira Natiijooyinka Hordhaca ah ee Xaqiiqooyinka iyo Gabo-gabada Sharciga, haddii ay haboon tahay, uu isbadello ku sameeyaa go'aanka asagoo cuskanaaya faalooyinkaas; uuna diyaarshaa jawaabta faalooyin kasta oo dadban.

(2) Waa inuu siiyaa Warbixinta Xoghayaha. Xoghayaha ayaa midkood aqbalaaya warbixinta, tuuraaya eedaymaha, ama ku celin kara kiiska Baaraha ANR asagoo siinaaya tilmaamaha baaritaan dheeri ah.

(i) Cabashooyinka ka dhanka ah Shaqaalaha ANR oo ku eedaynaaya fal xun oo ka dhan ah Xeerka Shaqaalaha Vermont iyo Tusmada Xeerka (iyo si gaar ah Xeerka Qaybta 8 iyo Qaybta 17). Baaraha ANR waa inuu yaqaanaa buug tusmeedka.[1] Haddii Baaraha ANR mar uun inta lagu jiro baaritaanka uu aaminsan yahay in ay jirto cadeyn muuqata oo sheegaysa in Shaqaalaha Gobalka uu sameeyay fal jebinaaya xeerka gobalka, kaasoo keenaaya takoor inta lagu jiro shaqadiisa, Baaraha ANR waa inuu:

(1) La xiriiraa uuna la tashtaa Waaxda Shaqaalaha ee Vermont. Kadib marka ay Waaxda Shaqaaluhu Ku taliso, waa inuu u gudbiyaa dhammaan agabka baaritaanka Waaxda Shaqaalaha;

(2) Waa inuu u sheegaa Gudoomiyaha Waaxda falku laga dacwoonaayo ka dhacay in ay jirto cadeyn wayn oo muujinaysa in takoor dhici karo, in baaritaanka loo gudbiyay Waaxda Shaqaalaha, iyo in Waaxda laga doonaayo inay shaqaale kale u dirto samaynta shaqada lagu eedeeyay in lagu gaystay falka si kasta oo uusan fal hore u dhicin; iyo

(3) Waa inuu u sheegaa cabtaha eedaymo kasta oo la xiriira takoorka oo lasoo gudbiyay, in baaritaanku ka sii socon doono sida ku cad Xeerarka Waaxda Shaqaalaha ee Gobalka.

[1] Buug tusmeedka ayaa laga heli karaa halkaan: https://humanresources.vermont.gov/labor-relations/manual
Buug tusmeedka ayaa laga heli karaa halkaan: https://humanresources.vermont.gov/labor-relations/manual

(j) Aasaaska Tuurista Cabashada. Baaraha ANR ayaa tuuri kara cabashada marka uu doono haddii Baaruhu go'aansho in:

(1) Xaqiiqooyinku aysan taageerayn sheegasho sax ah oo muujinaysa in takoor dhacay;

(2) Cabtuhu uusan ka cabanayn fal takoor ah oo ku cad habraacaan;

(3) Cabtuhu uuan soo gudbin eedaymo ka dhan ah ANR ama mid kamid ah laamaha ay maal geliso;

(4) Cabtuhu uu ku fashilmo inuu ka jawaabo codsiyada xogta dheeriiga ah; iyo/ama

(5) Cabashadu aysan ku imaan wakhtigeeda aysana jirin sabab macquul ah oo meesha looga saaro shardiga wakhtiga.

**§ 8. Diiwaan Haynta**

Iskuduwaha Kahortaga Takoorka ayaa gelin doona cabasho kasta oo qoraal ah diiwaanka ama kaydka xogta ayna ku jiraan taariikhaha, xaqiiqooyinka, iyo aasaaska falalka takoorka ee laga dacwoonaayo. Diiwaanka ama kaydka xogta waxaa sidoo kale ku jiri doona qeexitaanka qoraalka ah ee natiijaa baaritaanka. Diiwaankaan ama kaydkaan xogta waa inay akhrin karaan dadwaynuhu. Diiwaankaan ama kaydkaan xogta waxaa dIB u eegis sanadle ah ku sameyn doona Iskuduwaha Kahortaga Takoorka sixina doona marka loo baahdo, si loo xaqiijiyo qaraarka degdega ah ee cadaallada ah ee cabashooyinka la xiriira takoorka, iyo si loo aqoonsado qaybaha iyo ama dhibaatooyinka nidaamiga ah.

Lifaaqa 1.

ANR ayaa bixinaysa xogta soo socota ee la xiriirta goobaha cabashada ee wakaalladaha kale ee federaalka ama gobalka.

Xafiiska Garyaqaanka guud ee Vermont ayaa leh Waaxda Xuquuqda Madaniga ah (CRU) taasoo fulisa sharciyada gobalka Vermont ee (i) mamnuucaaya tkoorka shaqada iyo falalka kale ee cadaalad darada ah ee shaqada, (ii) siinaaya haqaalaha fasaxa aysan shaqada ku waynayn si ay u daryeelaan naftooda ama xubnaha qoyskooda, iyo (iii) bixinaaya magdhawyada madaniga ah ee dhibaneyaasha danbiyada nacaybka ku dhisan. CRU ayaa sidoo kale bixinaaya tusmada la siinaayo shaqsiyaadka iyo loo shaqeeyaasha oo ku aadan xuquuqahooda iyo waajibaadkooda ku cad sharciyadaan.

Shaqada Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Vermont waa in kor loo qaado xuquuqaha madaniga ah iyo xuquuqaha aadanaha ee buuxa ee Vermont.

Waaxda Amaanka Qaranka ayaa leh Xafiiska Xaquuqda Madaniga ah iyo Xoriyada Dadwaynaha (CRCL) kaasoo taageera shaqada Waaxda si loo ilaaliyo amaanka qaranka ayadoo haddana la ilaalinaayo xoriyada dadka, cadaallada, iyo sinaanta sida ku cad sharciga. CRCL ayaa dhisa nidaamyada xuquuqda madaniga ah iyo xoriyadaha shacabka oo lagu dabaqaayo shaqooyinka Waaxda asagoo:

- Kor u qaadaaya ilaalinta xuquuqda madaniga ah iyo xoriyadaha shacabka marka la abuuraayo lana dhaqan gelinaayo xeerka asagoo hogaanka iyo shaqaalaha Waaxda, iyo gobalka iyo iskaashatada maxaliga ah siinaaya tallo.
- Kala hadlaaya shaqsiyaadka iyo bulshooyinka xuquuqahooda madaniga ah ama xoriyadahooda saamayn kasoo gaari karto shaqooyinka Waaxda, asagoo uga waramaaya xeerarka iyo xaaladaha magdahwga, korna u qaadaaya feejignaanta ku haboon ee gudaha Waaxda ee ku aadan khibradahooda iyo walaacyadooda.
- Baaraaya cabashooyinka xuquuqda iyo xoriyadaha shacabka ee ay soo gudbiyeen dadwaynuhu lana xiriira xeerarka ama hawlaha Waaxda, ama falalka kale ee ay sameeyaan shaqaalaha Waaxdu.
- Wuxuu hoogaminayaa barnaamijyada waaxda ee fursada shaqada loo siman yahay wuxuuna hormarinayaa isku dhafka shaqaalaha iyo mabaadii'da ku dhisan aqoonta.

Waaxda Arimaha Gudaha waxay leedahay Xafiiska Isku dhafka, Wadajirka iyo Xuquuqda Madaniga ah kaasoo ah bar kulanka dhammaan xuuuqaha madaniga ah, barnaamijyada fursada loo siman yahay, iyo shaqooyinka shaqada wanaagsan ee Waaxda Arimaha Gudaha. Waxaan ka shaqeynaa abuurista iyo fulinta xuquuqaha madaniga ah iyo barnaamijyada fursada loo siman yahay oo waafaqsan sharciyada jira,

Amaradda Fulinta iyo xeerarka iyo inaan xaqiijino fursada loo siman yahay ee dhammaan shaqaalaha Waaxda iyo barnaamijyada federaalku maal geliyo ee Waaxda.

Wakaalada Difaaca Bii'ada Maraykanka ayaa leh Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah kaasoo dhaqan gasha sharciyada xuquuqda Madaniga ah, sida Title VII ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 kaasoo ka difaaca shaqaalaha iyo codsadeyaasha shaqada falalka takoorka, iyo sido kale codsiyada caawimaada macquulka ah iyo jebinta xeerarka ee la xiriira Sharciga Ameerikaanka Naafada ah. Halkaan ayaad ka helaysaa lifaaqa webseedkooda: Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah